

Kulan dhakhtar cilminafsi?

Dadka iyagu la kulma xaalado adadag waxay u bahanyihiin caawimo kala duwan. Mid kamid ah caawimada waxaa laga helaa wax qabadka dhakhtarka cilminafsi.

Muxuu yahay dhakhtar cilminafsi?

Dhakhtar cilminafsi waa qof leh xirfad 6-7 sano ayuu soo dhigtay waxbarasho asaasi ah ee jaamecadda, halkaa oo qaar farabadan ay waxbarashada sii wataan kaddibna ku taqasusaan. Dhakhtar cilminafsi waxaa mehnad la aqoonsanyahay, taana mecaheedu waa dadka aqoontaa leh oo keliyaa ayaa la dhihi karaa Norway waa dhakhtar cilminafsi. Dhakhtarka cilminafsi wuxuu aqoon u leeyahay gaar ahaan dareenka nololeed ee dadka iyo gocashada/falcelin noloshaa khuseysa. Dhakhtar cilminafsi wuxuu ka shaqeeyaa xaaladaha kala duwan ee noloshu shaqo, laakiin wuxuu gaar ahaan uga shaqeeyaa dadka dhibaataadu ka haysato dhimirka madaxa ee khuseeya xaaladdooda nololeed.

Sideebuu u shaqeeyaa dhakhtar cilminafsi?

Dhakhtar cilminafsi waxay shaqadiisu ku saleysan tahay maaddo iyo qalab la aqoonsan yahay wuxuuna u kuurgalaa baarisna ku sameeyaa daawiynta carruurta iyo dadka waaweyn ee dhibaataada ka haysato dhimirka. Kulanka dhakhtarka cilminafsi qofka waxaa ay xasuusisaa mawduucyo adag xasuus danqaneysa keenta, feker iyo dareen, halkaa oo uu dhakhtarka cilminafsi iyo qofka kaalmada u baahday si wadajir ay raadiyaa sidii loo heli laaha wanaajin ku saleysan xaaladda nololeed ee markaa taagan. Dhakhtar cilminafsi waxaa kale ee uu kaa caawimi karaa tabaruc sidii loogu heli lahaa arinta ka taagan reerka loona bedeli lahaa qaabka xun ee dhex yaalla reerka. Dhakhtar cilminafsi ma bixiyo daawo, laakiin badanaa waxay wada shaqeyni ka dhexeysaa dhakhtar cadi ah kuna saabsan marka loo baahdo daaweyn.

Dhakhtar cilminafsi ma dhexgalo arimaha dadka ee ku saabsan caawimo ujeedo leh marka la soo weydiisto sida warqad aqoonsi ku saabsan guuris, guri cusub iyo wixii la mid ah.

Waajib xog qarín

Dhakhtarka cilminafsi waajib xog qarín ayaa ka saaran shaqadiisa. Taana waxaa ku guda jira dhamaan wixii aad kala hadasho isaga iyo wixii aad soo qaado oo dhan cid kale u sheegi maayo, ha noqoto xitaa reerka qof ka mid ah, qeybaha caafimaad, dugsiga, xafiiska bulsho ama boliiskaba, adiga oo ogeyn ama aan aqoonsan. Marka keliya ee la burburinayo waajibkaa xog qarín waa marka ay ilmaha xaaladdoodu halis ku sugantahay, ama marka ay qofka noloshiisu halis ku sugantahay.

Turjubaan

Aad iyo aad ayey u adagtahay in ay qofku ka hadasho dareenkiisa kuna sheegto luqad kale oo aan aheyn afkiisa hooyo. Sidaa darteed waxaa wacan in la adeegsado turjubaan, inkasto oo qofka caawimo doonka ah uu bartay, yaqaano luqadda norwiiijiga. Turjubaan sidoo kale isna waxaa saaran waajib xog qarín ee waxaa looga hadlayo kulanka.